# QORSHAHA WAX QABADKA JAALLIYADAHA REER FIKTOORIYA

## Soo gaabinta Luqad sahlan oo Ingiriisa

**Si aad akhrido qorshaha dhamaystiran gal www.multicultural.vic.gov.au. Qorshe waxqabadka jaalliyadaha Afrikaanka ee 10ka sano ujeedadeedu waa soo dhowaynta jaalliyadaha, wanaajinta natiijooyinka iyo u abuurista fursado waari kara ee dadka reer Fiktooriya ee asal ahaan Afrika ka ka yimid.**

Qorshaha waxqabad waxaa loo abuuray bulshooyinka Afrika ka yimid waxaana samaynaya Jaalliyadaha Afrikaanka.

Horumarinteeda waxaa hogaamiyey African Ministerial Working Group (AMWG), kooxo kala duwan oo ka kooban 22 qof oo asalkoodu yahay Afrikaan, laga soo bilaabo Oktoobar 2016 ilaa Febraayo 2018. Mudadaas, boqolaal dad ah oo ka kala socda jaalliyadaha Afrikaanka ayaa bixiyey fikradooda si ay u caawimaan qaabaynta qorshaha.

Qorshe Waxqabadku wuxuu ka jawaabayaa arrimaha la wada ogyahay, ujeedkiisuna waa kor u qaadida iyo kaalmaynta dadka si loo sameeyo go'aano wanaajinaya noloshooda.

## JAALLIYADO QAADANAYA DOOR HOGAAMINEED

Qorshaha waxqabad wuxuu weydiiyaa dadka ka tirsan jaalliyadaha Afrikaanka inay yeeshaan, hogaamiyaan qaybna ka ahaadaan xalalka. Waxay u baahan tahay iskaashi, khayraad, khibrad, aqoon iyo aqoonta sida lagu abuuro isbedel waaraya.

Qorshaha Qabadka wuxuu kaloo weydiisanaya xukuumadaha, iyo weliba hay'adaha khayriga ah, kuwa gaarka loo leeyahay, jaamacadaha, si ay uga fekeraan siday ula shaqayn karaan bulshooyinka Afrikaanka ah si loo wanaajiyo samaqabkooda.

Qorshe waxqabad waxaa taageera afar qodob oo muhiima:

- Adeegsiga awoodaha iyo aqoonta bulshada
- Masuuliyad qaadka
- Wada shaqaynta
- Diirad saarida abuurista isbedel waaraya

## U SHAQAYNTA ISBEDEL WAARAYA

Qorshaha waxqabad wuxuu soo jeedinayaa 250 wax qabad oo khuseeya lix jaho oo xooga la saarayo.

Waxqabadyada la soo jeediyey waxaa looga jeedaa in lagu abuuro fursado dadka dhamaantiis si ay uga mid noqdaan, door u qaataan una guulaystaan.

Waxqabadyada waxay kaloo ku dhisan yihiin shaqooyin ay sameeyeen bulshooyinku, xukuumadaha iyo kuwa kale si loo caawimo dadka Afrikaanka ah ee degan Fiktooriya.

## QORSHAHA WAXQABAD EE LIXDA JAHO

1. **Ganacsiga**

   Hal abuurka dadka reer Fiktooriya ee koraya, shirkadaha iyo maalgelinta dhamaan dhaqaalaha

2. **Shaqada**

   Xoojinta xirfadaha iyo marinada si loogu hello shaqooyin waxtar leh dhamaan qaybaha kala duwan

3. **Waxbarashada iyo tababarka**

   Dhisida waxbarasho leh asaas xoogan iyo xirfadaha nolosha

4. **Caafimaadka iyo samaqabka**

   Kor u qaadida bulshada, samaqabka jireed iyo shucuureed ee dadka dhamaantiis

5. **Ka mid ahaanshaha iyo Awoodgelinta**

   Kaalmaynta dadka si ay u sinaadaan, oo loola dhaqo si xaq ah iyo ixtiraam

6. **Hogaaminta, isku xirnaanta iyo iska war-haynta**

   Door ka qaadashada Fiktooriya xoogan taas oo leh hogaamin, isku-xirnaanta bulshada iyo isku xirnaanta xoogan ee dhamaan mujtamaca.

# DUL KALA SOCODKA QORSHA WAX QABAD

## Saddex hadaf oo guud

Saddex arrimood ayaa caam ah dhamaan arrimaha xooga la saarayo.
Kuwaasi ayaa hagaya caawimaada bixinta wax-qabadka.

Ka qaybgal wanaagsan iyo adeegyo fiican

*Wanaajinta helida, isticmaalka iyo wax ku oolnimada iyada oo loo marayo ka qaybgalka weyn ee bulshada.*

Dhisida xirfadaha iyada oo loo marayo hawlwadaaga

*Taagerida hawlwadaag xoogan iyo fursadaha si loo dhiso kartida bulshooyinka si loo hogaamiyo loona bixiyo*

Wanaajinta aqoonta bulshada iyo caddaynta

*Xoojinta aqoonta bulshooyinka iyo helida caddayn wanaagsan si loo hago ficilka mustaqbilka*



# MEELAHA XOOGA LA SAARAYO IYO MAWDUUCYADA

Jaha kasta oo la waajahayo waxay muujinaysaa waxqabadyo wax ka qabta arrimaha ugu muhiimsan kuwaas oo hoos u dhiga dhaqaalaha iyo samaqabka bulshada dhamaan bulshooyinka Afrikaanka ah.

In ka badan kala bar dhamaan falalka looga jeedo caawinta iyo dhiirigelinta dadka dhalinyarada ah, iyo qoysaskooda.

Maadaama ay tahay qorshe 10 sanadood ah, waxqabadyada qaarkood ayaa dhowaan la bixinayaa, halka kuwa kale u baahan doonaan qorshayn intaas ka badan waxaana la bixinayaa mustaqbilka.

## Habka hor-u-socodka

Masuuliyada da'daalkaan ma khusayso hal dhinac oo dawlad, ama hal qayb oo bulshada ka mid ah.

Bixinta Qorshaha Waxqabad waxaa lagu maamuli doonaa 'hab wadaagid ah'. Taas macneheedu waxa weeye hawlgelinta dadka iyo ururada dhamaan bulshooyinka, dhamaan heerarka xukuumadeed iyo dhamaan qaybaha xagga bixinta waxqabadka.

## Mudnaanta hirgelinta

AMWG waxay sheegeen inay jiraan saddex arrimood oo muhiima kuwaas oo ay tahay inay ku jaheeyaan habka hor-u-socodka.

1. Is-xukumida iyo iskaashiga xoogan
2. Hawlgelinta bulshooyinka Fiktooriya dhamaan oo dhan
3. Qiyaasida, la socodka, qiimaynta iyo ka warbixinta horumarka

| AFAR JAHO | MAWDUUCYADA WAX KA QABANAYA FALALKA | |
|---|---|---|
| GANACSIGA (HAWSHA LA QABANAYO) | GANACSIGA<br>Hal-abuurnimada iyo curinta | Xiriirka Ganacsiga iyo hawlwadaaga<br>Ganacsiga iyo maalgelinta |
| SHAQADA | Diyaargarawga shaqada<br>Kuwa dugsiga ka baxa waqti hore iyo kuwa jaamacada ka soo baxa<br>Helitaanka shaqada iyo shaqaalaynta | Shahaadooyinka dibada iyo xirfadaha<br>Haysashada hor-u-socodka |
| WAXBARASHADA IYO TABABARKA | Waxbarashada ilmanimada hore<br>Ku xirnaanta waxbarashada<br>Barnaamijyada dugsiyada ka hor iyo ka dib<br>Carruurta ku jirta da'da dugsiga iyo dadka dhalinta yar | Waxbarashada dadka waaweyn iyo barashada<br>Khibrada shaqada iyo tabaruc-samaynta<br>Waxbarashada sarre iyo tababarka mihnadeed |
| CAAFIMAADKA IYO SAMAQABKA | Caafimaadka dhimirka<br>Caafimaadka jireed iyo cudurada waaweyn<br>Rabshada Qoyska | Dadka dhalinta yar oo khatarta ku jira<br>Dadka da'da ah iyo dadka waaweyn<br>Xoojinta qoysaska |
| KA MID AHAANTA IYO AWOODGELINTA | Kuwa dhowaan yimid<br>Dadka iinta leh<br>Dadka da'da ah iyo dadka waaweyn<br>Sinjiga iyo galmoodka | Dadka xabsiyada ku jira<br>Dumarka iyo sinaanta sinjiga<br>Amaangelinta ilmaha |
| HOGAAMINTA, ISKU-XIRNAANTA IYO ISKA WARHAYNTA | Hogaaminta bulshada<br>Wadaagista aqoonta iyo xiriirinta<br>Isku duubnida dhamaan bulshada<br>Dadka dhalinta yar | Kaabayaasha iyo tas-hiilaadka<br>Warbaahinta<br>Fahamka sharciga Australia iyo la macaamilida xukuumadaha |

VICTORIA